



DEGMADA ERIE

MARK POLONCARZ

WAAXDA FULINTA EE DEGMADA

GALE R. BURSTEIN, MD, MPH, FAAP
GUDOOMIYAHA CAAFIMAADKA

SU'AALAHHA IYO JAWAABAHHA KARANTIIL COVID-19

Qofkee ayay arintaani qusaysaa?

Qof walboo dagan Degmada Erie, oo laga helay caabuqa COVID-19.

Ma waxaan ku jiraa Karantiil?

Qof kasta oo dagan Degmada Erie lagana helay COVID-19 waa inuu galaa karantiil si waafaqsan Amarka Gudoomiyaha ee Wali Taiga.

Maxaa dhacaaya haddaan iska indho tiro amarka karantiilka?

Inaad diido amarka Karantiilku waa danbi lagugu ciqaabi karo sida ku cad Farqada 12-b ee Sharciga Caafimaadka Dadwaynaha. Waxaa intaas dheer, Waaxda Caafimaadka ayaa kugu xukumi karta in lagugu xabiso xarun caafimaad sabab la xariirta inaad ku-guuldaraysatay adeecidda amarka.

Waa hagaag, marka sidee uga baxayaa Karantiilka?

Waa inaad ku jirtaa karantiilka ilaa aad ka buuxiso Shuruudaha Fasaxa ee ay dajisay Waaxda Caafimaadka ee Gobalka New York (New York State Department of Health). Marka aad buuxiso Shuruudaha Fasaxa, waad ka bixi kartaa Karantiilka.

Waa maxay Shuruudaha Fasaxu?

Waa kuwaan shuruuduhu:

Haddii aad dareentay wax ka mid ah astaamaha soo socda: Qandho, Qufac, Neef Yaraan/Neefta oo Ku dhibta, Shuruudaha Fasaxu waa:

- In laga joogo ugu yaraan 7 maalmood markii koobaad ee astaamuhu kugu biloowdeen; IYO
- In aanad dareemin wax qandho ah ugu yaraan 3 maalmood, adoon cunin daawada qandho jabinta (sida Tylenol); IYO
- In neef yaraan kasta/qufac/neefsashadoo kutu adkaataa ay fiicnaatay

Haddii aad buuxiso DHAMMAAN SADEXDA shardi, waad ka bixi kartaa karantiilka.

Haddii aadan dareemin wax kamid ah astaamahaas, Shuruudaha Fasaxu waa:

- In laga joogo ugu yaraan 7 maalmood markii koobaad ee lagaa helay cudurka COVID-19; IYO
- In aanad dareemin wax xanuun ah mudadaas kadib

Haddii aad buuxiso LABADAAN shardi, waad ka bixi kartaa Karantiilka

Marka haddaan buuxsho Shuruuda Fasaxa gabi ahaanba meeshaan rabaan aadi karaa miyaa?

MAYA! Inaad buuxiso Shuruudaha Fasaxu waxay kaliya kuu fasaxaysaa inaad ka baxdo Karantiilka caafimaadka. Wali waxaa qasab ah inaad raacdo dhammaan sharciyada Gobalka iyo kuwa maxaliga ee ku quseeya iyo Amarada Waaxda Fulinta. Marka tusaale ahaan:

KARTO (PLEASE ADD TO THE SENTENCE)	SAMAYN KARIN (PLEASE ADD TO THE SENTENCE)
Inaad aado dukaanka adeega raashinka	Inaad aado xaflad
Inaad Banana Lugayso	Inaad ciyaar la dheesho koox dad ah
Inaad aado shaqada haddii shaqadaada ganacsiga muhiimka ah ay adeeg muhiim ah bixiso sida ay ku qeexan Shirkada Hormarinta Gobalka ee (Empire State Development Corporation)	Inaad aado shaqada haddii aadan ka shaqayn shaqo muhiim ah bixisa ganacsi muhiim ah ama adeeg muhiim ah.

Ma jiraan tilmaamo kale oo gaar ah oo ay tahay inaan ogaado?

Haddii aad tahay shaqaale ka shaqeeya daryeelka caafimaadka, shaqaalaha gurmada degdega ah, ama shaqaale qabta shaqo kale oo muhiim ah aadna ku laabanayso shaqada waxaa lagaa doonayaa inaad xirato afxir muddo 14 maalmood ah kadib marka cudurku kugu dhacay ama kadib marka lagaa helay COVID-19 haddaad astaamaha xanuunka leedahay iyo haddii aadan lahayn labadaba. Fadaln waydii shirkada aad u shaqayso wixii tilmaamo dheeraad ah.

Laakiin haddii la iga fasaxay Karantiilka, qof kale kuma ridi karo cudurka, sax miyaa?

Sax maaha. Inkastoo Shuruudaha Fasaxa loo sameeyay in lagu yareeyo khatarta faafida COVID-19, wali waa macquul inaad dadka kale qaadsiiin karto caabuqa.

Maxaan samayn karaa si aan si aan arintaas uga hortago?

Taxadar. Si joogto ah oo adag u nadiifi gacmahaaga. Dabool afkaaga markasta ood qufacayso. Ka fogoow u dhawaanshaha qof kasta oo ka wayn 65, ama qof kasta oo difaaciisa jirku liito ama qaba xanuun uur ku jirta ah. Raac xeerarka ugu haboon ee kala fogaanshaha dadka. Guriga joog ilaa ay qasab tahay inaad banaanka aado maahee.

Waan fahmay dhammaan tilmaamahaas. Ma jiraa wax aan uga baahanahay Waaxda Caafimaadka?

Maya. Markaad buuxiso Shuruudaha Fasaxa, mudada aad ku jirayso takoorku way dhamaanaysaa.